

Diiwan gelinta cabashada ka dhanka xaruun ama xirfadle caafimaadeed

Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso Xafiiska Rukhsad Siinta Xirfadleyaasha Caafimaadka haddii ay dhacda in xirfadle caafimaad ama xaruun caafimaad ay ku xadgudbaan heerarka anshaxa xirfadeed.

1. Intaadan bilaabin

Qof walbo ayaa cabasho ka gudbin karaa cida rukhsadda haysato ka dib na xafiiska ayaa qiimeeyn doono cabashadaasi. BHPL waxay kugula talinaysaa inaad cabashada ku gudbiso **Irida Cabashada Online-ka Ah.**

1. Markaad tilmaanta samaynayso si fiican u faahfaahi inta surogalka ah adigoo ku daraayo goobta, taarikhda, magaca cidda rukhsadda leh, lambarka rukhsadda, marqaatiyaalka, iwm. Kala saar gudbinada dad kala duwan iyo/ama xaruumaha kala duwan ee cid kasta aad ka cabanaysid gudbin duwan u samee.
2. Ku dar dhammaan koobiyaalka diiwaanada caafimaadeed, xiriirada idin dhex maray, qandaraasyada, sawirada, iyo dukumeenti kale aad ku taageerto cabashadaada goorta aad gudbinayso. **Dib uguma soo laaban kartid cabashadaada mar haddaad gudbiso.**
3. Xafiiska ayaa adeeg bixiyaha ka codsan karaa diiwaano daawayneed ama caafimaadeed si ay u baaraan cabashadaada haddii cabashada ay khuseyso daawayn lagu siiyay bukaan ahaan. Irida cabashada online-ka ah waxay leedahay idmin elektrooniga ah si loo daayo diiwaanadaasi.
4. Markay cabashadaada soo gaarto, Xafiiska wuxuu si taxaddar leh u qiimeeyn doonaa dhammaan maclumaadka la heli karo. Xafiiska wuxuu ku dhaqaaqi karaa mid ka mid ah tallaabooyinka xiga:
 - a. Wuxuu Xafiiska furi karaa cabasho rasmi ah sidoo kale na wuxuu qaadi karaa tallaabo anshax-marineed.

- b. Wuxuu Xafiiska furi karaa baaritaan lagu qaado ficilka shaqaale si loo go'aamiyo inay jirto caddayn xadgudub.
 - c. Wuxuu Xafiiska xiri karaa cabashada sababo kala duwan awgood sida caddayn ku filan oo la waayay, cabashada oo ka baxsan baaxadda hawsha xafiiska, in la waayo xadgudub sharciyeed ama xeereed, iwm.
5. Hadduu Guddi furo cabasho rasmi ah, cabashada rasmiga ayaa la tuuri karaa, waxaa lagu xalin karaa tallaabada aan anshax-marinta ahayn, ama waxay dhalin kartaa tallaabo anshax-marineed in lagu qaado cida rukhsadda haysato.

Tallaabooyinka aan anshax-marinta ahayn waxaa soo galaan:

- a. Warqad talo siin
- b. Tallaabo aan anshax-marinta ahayn oo laga kormeeraayo.

Tallaabooyinka anshax-marineed waxaa soo galaan:

- c. Canaan
- d. Xilli Tijaabo laga kormeerayo
- e. Joojin ama Burin

Guddigu waxaa waajib ku ah inay helaan caddayn cad oo tusaayo xadgudub sharciyeed ama xeereed si ay u xanniban rukhsadda.

6. Xafiiska hadduusan ahayn wakaaladda saxda ee cabashadaada ku habboon inuu wax ka qabato, waxaanu u gudbin karnaa cabashadaada wakaalad ama barnaamij kale.
7. Foomamka cabashada warqadeed ayaa codsi lagu heli karaa. Fadlan wac Xafiiska Rukhsad Siinta Xirfadleyaasha Caafimaadka – Xafiiska Ilaalinta Dadwaynaha lambarkan (617) 973-0865 ama kala xiriir iimayl halkan bhplcomplaints@mass.gov.

2. Cabashadaada markaad gudbiso ka dib:

Xafiiska ayaa kuusoo gudbin doonaa, adigoo ah qofka cabanaya, ogeysiin qoraal ah haddii tallaabo dheeraad ah laga qaado cabashadaada. Cida rukhsadda haysato ee lagu magacaabay cabashada ayaa la ogeysiin

karaa oo koobi cabashadaada loo diri karaa iyadoo laga codsanaayo inay jawaab celin qoraal ka sameeyaan eedeynta.

Mudada baaritaanka ayaa isbedbedeli karaa hadaba kiiska markii loo eego, iyadoo ku xiran nooca kiiska, gaar ahaan haddii diiwaanada caafimaad ama maclumaad kaloo muhiim ah loo baahan yahay in la codsado. Waxay qaadan kartaa ilaa hal bil si loo qiimeeyo ama ilaa saddex sanno oo lagusoo rogo tallaabo anshax-marineed.

Markii kiiska la xaliyo, waxaa laguugusoo ogeysiin doonaa tallaabada ay qaaday Xafiiska, markii laga reebo kiiska cabashooyinka magaca lahayn.

Cabashooyinka aan magaca lahayn

Waxaanu, ikhtiyaarkeena ku baari karnaa cabashooyinka magaca lahayn haddii:

1. Cabashada ay ku eedeyneyso xad gudubyo sharciyeed ama xeereed ee waajibbayso tallaabada Guddiga ama wadata halis degdeg ee caafimaadka iyo amniga dadwaynaha.
2. Cabashada ay leedahay xog ku filan in baaritaan lagu qabto.
3. Caddaynta xadgudubka lagu eedeynaayo in laga heli karo meelo kale
4. Caddaynta eedeynta inay u baahnayn aqoonsashada iyo/ama markhaati furka shakhsiga cabashada samaynaayo.

Cabashooyinka magaca lahayn waa la qiimeyn doonaa; laakin, waxaa dhici kartaa inuu Xafiiska awood u yeelan waayo inuu baaritaan buuxda sameeyo ama inuu qaado tallaabo anshax-marineed haddii meelo kale laga heli waayo caddayn lagu taageero.

Dhammaan kiisaska waa la qiimeeyaa mudnaan na waa la siiyaa. Mudnaanta ugu weyn waxaa la siiyaa kiisaska ee halis surogal ah ama degdeg ah u keensan karto ama halis waxyeelo u leh bukaan ama bukaano.

Arrimaha ka baxsan awooddeena

- Khilaafyada khidmadeed, sida lacag bixinta ballamada la gafay.
- Khilaafyada kharashka, sida qiyaasta cida rukhsadda haysato ay ku dallacdo adeegyada.
- Khilaafyada dabeecadeed (ilamaa haddii ay noqoto xad anshaxa darrada xirfadeed.)

Xagga ka warbixinta qiyaanada adeega caafimaad:

Waxaad **ka gudbin kartaa cabashada qiyaanada adeega caafimaad** xirfadleyaasha iyo xaruumaha ay rukhsadda siisay Guddiga Diiwan Gelinta Dhaqaatiirta Xubnaha iyo Guddiga Diiwan Gelinta Qaybaha Caafimaadka Midooway.

Ma waxaad raadinaysa xog dheeraad oo ku saabsan cabasho la xaliyay?

- Tallaabooyinka anshax-marineed iyo tallaabooyinka kale ay fuliyeen guddida diiwan gelinta BHPL, ayaa online-ka laga heli karaa.
- **Diiwaanada dadwaynaha ayaa laga codsan karaa Xafiiska Rukhsad Siinta Xirfadleyaasha Caafimaadka.**

WAAXDA CAAFIMAADKA DADWAYNAHA
XAFIISKA RUKHSAD SIINTA XIRFADLEYAASHA CAAFIMAADKA
 TELEFOONKA (617) 973-0865 FAKISKA (617) 973-0985 TELEFOONKA DHAGOOLKA (617) 973-0988
<https://www.mass.gov/orgs/bureau-of-health-professions-licensure>

Fadlan buuxi dhammaan qaybaha hoose inta awoodaada adigoo inta awoodaada faahfaahinaysid. Fadlan ku qor qallin si fiican u muuqdo.

MACLUMAADKAADA:

Magacaada Saddexaad	Magacaada Koowaad	Magaca Dhexe
Cinwaanka Boostada	Magaalka	Gobolka
		Goobta Xaafadda
Lambarka Telefanka #	Iimaylka	

MAGACA IYO CINWAANKA XIRFADLAHA CAAFIMAAD (u isticmaal foomam kala duwan shakhsi ama ganacsi/xaruun kasta aad dooneyso inaad ka cabato):

Magaca Saddexaad ee Cida rukhsadda haysato	Magaca Koowaad ee Cida rukhsadda haysato	Lambarka rukhsadda # (waa haddii la yaqaano)
Magaca Ganacsiga/ Xaruunta		Lambarka Telefanka #
Cinwaanka Jidka Ganacsiga/ Xaruunta		
Magaalka	Gobolka	Goobta Xaafadda

Rukhsadda#Ganacsiga/Xaruunta (waa haddii la yaqaano): _____

FADLAN DOORO XIRFADLAHA AMA XARUUNTA AY CABASHADANI KHUSEYSO:

☐ Kalkaaliyaha Diiwaangashan ☐ Kalkaaliyaha Suuxinta ☐ Kalkaaliyaha Xirfadle ☐ Kalkaaliyaha Rukhsadda leh ☐ Farmashiiste ☐ Farmashiiste, Daawaynta Kaahfalka ☐ Farmashiiste Farsamo Yaqaan ☐ Caawiyaha Dhaqtarka ☐ Dhaqtarka Ilkaha ☐ Dhaqtarka Ilkaha Takhasuska Daawaynta ☐ Caawiyaha Dhaqtarka Ilkaha ☐ Xirfadlaha Mashiinka Wadnaha iyo Sambabka ☐ Xirfadlaha Ku Meel Gaarka Mashiinka Wadnaha	☐ Dhaqtarka Xanuunada Neefsashada ☐ Maamulaha Daawaynta Mudada Dheer (NHA) ☐ Shaqaalaha Caafimaadka Bulshadda ☐ Dhaqtarka Dabiiciga ☐ Dhaqtarka Xubnaha ☐ Xirfadlaha Mashiinka Maqalka ☐ Qofka Baranaayo Mashiinka Maqalka ☐ Xirfadlaha Cunnada iyo Nafaqada ☐ Dhaqtarka Indhaha Aragga ☐ Dhaqtarka Lugaha ☐ Dhaqtarka Lugaha ee Leh Rukhsadda Xadidan ☐ Xirfadlaha Cabbirka Indhaha ☐ Xirfadlaha Cabbirka Dhagaha
---	---

_____ Aqoon Yahanka Dhaqanka la isticmaala
_____ Caawiyaha Aqoon Yahanka Dhaqanka la isticmaala
_____ Aqoon Yahanka Cilmi Nafsiqa Waxbarashada
_____ Aqoon Yahanka Guurka iyo Qoyska
_____ La Taliyaha Caafimaadka Maskaxda
_____ La Taliyaha Dhaqan Celinta
_____ Farmasiga Tafaariiqda /Dukaan Daawa
_____ Bakhaar Faafineed
_____ Xaruun Daawaynta Jireed
_____ Xaruun Warshadaynta Daawada Gobolka Dhexdiisa
_____ Xaruun Warshadaynta Daawada Gobolka Ka Baxsan
_____ Farmashi Daawaynta Kaahfalka
_____ Xaruunta Daawaynta Xubnaha
_____ Rukhsadda Xaruunta Daawaynta Dhaqdhaqaaqa

Daawo qaldan
Naafayn
Hawl ka badan baaxadda logu talagalay
Dayac lagu sameeyey bukaanka
Hawl rukhsad la'aan
Isticmaal khaldan ee daawo
Tayada adeega la bixiyay

_____ Qiyaano
 _____ Xukun dembi/dhaqan dembi
 _____ Aqoonsi xanuuneed qalad ah
 _____ Awood la'aanta in la helo diiwaanada ama sawirada
 _____ Falcelin daran oo natiijo daawo suuxin
 _____ Ku xadgudubka bukaanka
 _____ Kale (fadlan hoosta ku caddee)

Fadlan tilmaan dhacdada(dhacdooyinka) ee sababay cabashadaada sidoo kale na sheeg xiliyada iyo taarikhda dhacdooyinka dhaceen. Liis garee magacyaalka dhammaan shakhsiyaalka qaybta ka ah. Fadlan ku lifaaq boggag dheeraad haddii loo baahda.

[illegible]

(Fadlan isticmaal wargad kale haddaa u baahatid. Ha ku gorin darfaha.)

ADEEG BIXIYAHII HORE (waa hadday khuseyso):

Magaca

Lambarka Telefanka #

Jidka

Magaalka

Gobolka

Goobta Xaafadda

ADEEG BIXIYAHII KU XIGAY* (waa hadday khuseyso):

**Ku lifaaq warbixinta adeeg bixiyahii ku xigay (waa hadday khuseyso).*

Magaca

Lambarka Telefanka #

Magaca

Magaalka

Gobolka

Goobta Xaafadda

Arrintan ma kala hadashay cida rukhsadda haysato, xafiiska cida rukhsadda haysato, ama xaruunta? ☐ haa ☐ maya

Hadday jawaabtu haa tahay, fadlan qor magaca iyo telefoon lambarka qofka aad la xiriirtay:_____

Taariikhda xiriirka: _____ Xiriirka sidee u samaysay? (telefoon, iimayl, warqad, shakhsi ahaan):

Natiijada xiriirka: _____

Hadday jireen markhaatiyaal dhacdada lagu tilmaamay cabashadaada, fadlan sheeg magacyada markhaatiyaalka iyo telefoon lambaradooda (waa hadday khuseyso):

Cabashadan ma ka samaysay wakaalad kale ee dawlad goboleedka ama dawladda federaalka? ☐ haa ☐ maya

Hadday jawaabtu haa tahay, fadlan faahfaahin ka bixi: _____

Haddii xalinta cabashadan shardi u noqoto, diyaar ma u tahay inaad shakhsi ahaan ku maragfurto dhagaysi rasmi ah?

☐ Haa, diyaar baan u ahayy. ☐ Maya, diyaar uma ihi.

Xog ama qoraal dheeraad ma raacsan yahay?

☐ Haa

☐ Maya

Si loo dedejiyo geedi socodka cabashada, fadlan soo gudbi koobiyaal si fiican u muuqda (MA AHA kuwa asalka) ee dhammaan dukumeentida la xiriira ee taageeraya cabashada aad gudbineysid (tusaale. qandaraasyo, diiwaano caafimaad, jeegag la buriyay, iwm.). Xafiiska ayaa kuusoo gudbin doono, adigoo ah qofka cabanaya, ogeysiin qoraal ah haddii tallaabo dheeraad ah laga qaado cabashadaada. Cida rukhsadda haysato ee lagu magacaabay cabashada ayaa la ogeysiin karaa oo koobi cabashadaada loo diri karaa iyadoo laga codsanaayo inay jawaab celin qoraal ka sameeyaan eedeeynta.

IDAMKA LA WADAAGA DIIWAANADA IYO GUDBINTA CABASHADA

Saxiixayga foomkan, ama koobigiisa, wuxuu u idmayaa Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha, Xafiiska Rukhsad Siinta Xirfadleyaasha inay: (1) helaan koobiyaalka dhammaan diiwaanadayda caafimaadka ee la xiriira cabashadayda; (2) in lala wadaago cabashada iyo dhammaan diiwaanada ay soo uruurisay Xafiiska Rukhsad Siinta Xirfadleyaasha Caafimaadka intii lagu jiray baaritaanka cabashadayda cida rukhsadda haysato si ay cida rukhsadda haysato ugu isticmaasho inay kagasoo jawaabto eedeeynta cabashadan; iyo (3) in loo gudbiyo cabashadayda to waaxyada kale maareyneed iyo/ama sharci sugidda si tallaabo laga qaado.

Waxaanu fahasanahay in dhammaan cabashooyinka la baari doono si loo xaqiijiya run ahaanshohooda.

Tallaabada aan ku qaaday inaan buuxiyo cabashada iyo inay DPH heshay iyo/ama baaraysa micneheeda ma aha in tallaabo anshax marineed laga qaadi doono cida rukhsadda haysato.

Waxaanu ku dhawaaqayaa inay da'dayda tahay ugu yeraan 18 sano iyo waxaan xaqiijinayaa anigoo fahansan ciqaabta been abuurka in xogta lagu bixiyay cabashada tan ay tahay run iyo sax inta aqoontayda, xogteyda, iyo aaminaadayda.

Saxiixa Bukaanka ama Qofka Sharciyan
Matalaayo
(Ku Lifaq Dukumeentida)

Taariikhda

Foomkan u dir:

Department of Public Health
Bureau of Health Professions Licensure
Attn: Office of Public Protection
100 Cambridge St., 19th Floor Boston,
MA 02114-2509

ISTICMAALKA DPH OO KELI:

Saxiixa Agaasimaha Guud ama Wakiilka Guddiga ee Loo Qoondeeyey

Taariikhda